Heshiiska ogolaanshaha ee caruurta 6-17 sanno

Waxaan ogolaanayaa in ilmahayga la siiyo kaadhka maktabadda waxaan kaloo ogolaanayaa in maktabadda magalaada Sundsvall faraha ku hayso macluumaadka shakhsiyeed sida waafaqsan sharciyada amaahashada maktabadda.waa isoo gaadheen sharciyada amaahashu waana balan qaadayaa in aan raaco.

Macluumaadka ilmaha

Si faseexa u qor!

- lanbar shakhsiyeedka ilmaha ÅÅMMDD-XXXX

Qor taariikhda dhalashadu hadii afartii lanbar aanu lahayn ÅÅMMDD

- ilmaha ina ayadiisa/magaca qoyska
- ilmaha magicisa
- adareeska waddada
- boosto lambarka
- magaalada
- mobil lambarka / telefoon lambarka
- ciwaanka iimeylka

Macluumaadka masuulka iyo wakiilka ilmaha sharci ahaan

Si faseexa u qor!

- magaca danbe ee masuulka ama wakiilka ilmaha sharci ahaan
- masuulka ilmaha amawakiilka ilmaha lambar shaqsiyeedkiisa

Ange taariikhda dhalashada qor hadii afartii aanay jirin

- masuulka ilmaha ama wakiilkiisa sharci ahaan moobiil lanbarkooda
- masuulka ilamaha ama wakiilka sharci ahaan iimeylkooda
- saxiixa masuulka ilamaha ama wakiilka ilmaha sharci ahaan
- taariikhda maanta

- Macluumaad khasab ah-khaanadahan waa khasab in la buuxsho.

OBS! fiiro gaar ah! Ha ilaawin in aad soo qaadato aqoonsi sawirkaagu ku yaalo oo shaqaynaya markaad maktabadda imaanayso.

Sharciyada amaahda

somaliska

2018

Sundsvalls kommun

Sundsvalls stadsbibliotek

Soo dhawoow!

Kaadhka maktabadda waaxad ku isticmaali kartaa adeegyada maktabadda oo dhan. Waxaad kaga amaahan kartaa si bilaash ah kuli maktabaddaha kuu dhow maktabadda (Kulturmagasinet) iyo maktabadda wareegtaba. Si bilaash ah ayaa lagu samaystaa kaadhka maktabadda.

Aqoonsi muhiim ah

Waxaa laguu samaynayaa kaadhka maktabadda markaad keento aqoonsi shaqaynaya oo sawirkukaagu ku yaal. Kaadhka maktabaddu waa aqoonsi shaqsiga u gaar ah oo muhiim ah. In aad ku ogolaato maaha qof kale in uu isticmaalo kaadhkaaga maktabadda. Adiga ayaa masuul ka ah wax kasta oo kaadhkaaga lagu amaahdo. Hadii kaadhku kaa lumo waa khasab in aad dhkhso ula xidhiidhid maktabadda si kaadhka loo xidho. Iibsashada kaadh maktabadd oo cusub qiimihiisu waa:

- 30 karoon dadka waaweyn
- 10 karoon caruurta 18 sanno ka yar.

Kaadhka maktabadda caruurta 6-17 sanno

Caruurta iyo dhalinyarada u dhexeysa 6-17 sanno waxay kaadhka maktabadda ku heli karaan iyagoo soo buuxiya warqad heshiis ogolaansho ah oo ay maktabadda keenaan. Warqada heshiiska ogolaanshaha waxaan soo buuxinaya masuulka ilmaha ama wakiilka ilmaha sharciyan metela. Hadii aad 18 sanno ka yar tahay oo aadan haysan wax aqoonsi ah oo sawirkaagu ku dhegan yahay waxaa khasab ah in masuulkaaga ama wakiilkaaga sharciyan ku metela kuu soo raaco maktabbada ka dibna qofkaasi aqoonsigiisa dhiibo. Masuulka ilmaha ama wakiilka ilmmaha sharciyan metela baa ka masuul ah caruurta kaadhkeeda iyo waxkastoo lagu amaahdo.

Kaadhka maktabadda ee dugsiyada

Saaxafada loo isticmaalayo waxbarashada dugsiyada waxaa lagu amaahanayaaa kaadh maktabaddeed oo dugsiga magaciisa ah. Dugsiga ayaa masuul ka ah wax kasta oo lagu amaahdo kaadhkaas.

Wakiil

Hadii aadan adigu shakhsiyan imaan karayn maktabadda waxaad wax ku amaahan kartaa wakiilasho. Wakiilku waa Khasab in uu haysto warqad qoraal ah oo wakiilasho ah oo uu saxeexan yahay qofka wax soo wakiishay iyo aqoonsiyo shaqaynaya oo cadaynaya haybta qofka wax wakiishay iyo kan wakiilka ahba. Warqad wakiilashada waa in markasta la keeno markasta oo wakiilku u amaahnayo wax qofka soo wakiishay.

Wakhtiga amaahashada

Maalinka ugu danbaysa ee lasoo celin karo waxay ku taala rasiidka amaahashada.waxaad ka hubin kartaa wakhtiga amaahashada kana samayn kartaa markale in aad sii amaahato webseytka:
www.sundsvall.se/bibliotek
Waxaad amaahda dib u amaahan kartaa ugu badnaan laba jeer. Adigaa ka masuul ah wixii aad amaahatay ilaa amaahda diiwaanka laga saarayo.

Lasoo habsaamida amaahda

Hadii aad tahay qof 18 sanno ka wayn waa Khasab in aad bixiso khidmad lasoo daahid ah hadii aad lasoo daahday ama aad dib u amaahatay buwaagtii wakhtigii oo kaa dhamaaday. Kaadhkaaga maktabadda waa la xidhayaa hadii ay jiraan khidmado aadan bixin oo gaadhaya 50 karoon iyo wax ka badan.khidmada dhan waa in la bixiyo si xanibaada kaadhkaaga looga qaado. Hadii aadan soo celin wixii aad amaahatay waxay maktabaddu kusoo diraysaa xasuusin laba jeer. Wixii intaas ka danbeeya kharash in aad soo bixiso baa laguu soo dirayaa kaadhka maktabaddana waa la xanibayaa. Warqadii lacagteeda la bixin waayo waxay u gudbaysaa shirkadaha daymaha dabagala (inkasso).

Khidmada lasoo habsaamida

Khidmada lasoo habsaamida waxaa bixinaya dadka waaweyn laga soo bilaabo 18 sanno jir.

- shay kasta oo la amaaday waa 10 karoon asbucii u bilowdaydaba oo habsan ah.
- lacagta ugu badan markasta oo wax lasoo celinayo waa 200 oo karoon.

Magdhowga googoynta ama luminta saaxaafada

Lumitaanka ama googoynta buwaagta iyo wixii kale ee saxaafad ah waxaa lagu magdhabayaa qiimihii lagu soo iibshay, laakiin ugu yaraan sidan soo socota. Caruurta ka yar 18 sanno waxaay waajib maddhowgu ku tahay in ay bixiyaan caruurta masuulkooda ama waalidkood sharciyan.

- saxaafada dadka waaweyn 300 karoon
- saxaafada caruurta (marka laga reebo buuga "pekbok") 200 karoon
- buwaagta (pocketbok iyo (pekbok) 100 karoon
- jariirad qoraal 60 karoon

Maktabaddu way aqbalaysaa keenida bedelkii la mid ah. Khidmad ah 50 karoon baa lag qaadayaa si buuga loogu qalabeeyo in la amaahan karo.saxaafadii bedel ahaan loo egoo dib looma soo bixinayo lacag ahaan.

Digniinta in wakhtigii dhamaad yahay

Maktabadda dawlada ee Sundsvall waxay siinaysaa adeega kaaga digaya wakhtigii amaahdu markuu sii dhamaanayo. Waxay tahay fariin ayaa kuugu soo dhacaysa ciwaankaaga iimeylka ama mobiil lanbarkaaga marka wakhtigii amaahashadu kaa ekayd dhowdahay. Markasta adigii masuul ka ah in amaahdii wakhtigeeda lagu soo cesho xataa hadii aynan digniinta in wakhtigii amaahdu dhamaanayo ku soo gaadhin.

Balansashada iyo amaahashada maktabadd kale

Waxaad balansan kartaa ugu badnaan 10 balansi isku mar. Taas waxaa loo sameeyey si looga dhigo taytalada caanka ah kuwola heli karo. In laga dalbato maktabadd goob kale ku taal waa lacag.

- 25 karoon gudaha wadamada waqooyiga yurub (Norden).
- ka soo amaahashada wadamo waqooyiga yurub ka baxsan waa 150 karoon.

Kombuyuutarada

Waad isticmaali kartaa maktabadda kombuyuutaradeeda dadweynaha.laguuma ogola in aad ka raadiso ama kusoo bandhigto waxyaabo ah qaawanaan anshaxxumo ah, cunsurinimo iyo waxyaabo sharciga ka hor imanaya. Qof kale baaswoodhkiisa iyo aqoonsigiiba ma isticmaali kartid. Hadii sharciyada jebiso waxaa lagaa xanibayaa kaadhkaaga maktabadda saddex bilood.

Xeerka ilaalinta xogta-GDPR

Markii aad samaysatid kaadh maktabaddeed ama aad ogolaato in caruurtaada loo sameeyo kaadh maktabbadeed amaba aad hadaba leedahay kaadh maktabadded waxaad ogolaanaysaa adigu in macluumaadkaaga shaqsiyeed laga diiwangeliyo diiwaanka amaahqaatayaasha maktabadda sida uu dhigayo xeerka ilaalinta xogta guud GDPR.

Macluumaadkaaga shaqsiyeed waxa loo isticmaalayaa keliya shaqada maktabadda iyadoo ujeedaduna tahay in la diiwaan geliyo amaahashada iyo balansashada maktabadda saxaafadeeda ama adeegyadeeda. Macluumadka shakhsiyeed waxaa lagu kaydinyaa nidaamka maktabadda dawlada ee Sundsvall.

Buwaagta iyi waxyaabaha kale ee saxaafada oo aad amaahato ama ku balansato kaadhkaaga maktabadda waxaa lagu diiwaangelinayaa siisteemka kombuyuutarka. Macluumaadkaasi waa kuwo sir oo la ilaaliyo sida sharcigu dhigayo. Sida ugu dhakhso badan oo amaahda loo soo cesho, ama wixii deyn ah loo bixiyo, waa laga masaxayaa macluumadkana kaadhkaaga maktabadda.

Waxaad heli kartaa wixii kaa diiwaangashan macluumaadkaaga shaqsiyeed oo daabacan adigoo u maraya in aad aqoonsi shaqaynaya maktabadda tustid. Waxaad dib u cusboonaysiin ku samayn kartaa macluumaadkaaga shaqsiyeed intaad maktabadda lasoo xidhiidhid adigoo tusaya aqoonsi shaqaynaya ama in aad ka saxdid adigi shakhsiyan intaad gashid baybka kuu gaarka ah ee websaytka maktabada (mina sidor). Hadii aadan isticmaalin kaadhkaaga maktabadda muddo shan sanno ah way masaxmayaan macluumaadkaaga shakhsiyeed. Waxaad xaq u leedahay in macluumaadkaaga shakhsiyeed lagaa masaxo laakiin markaas waxba maktabadda kama amaahan kartid.

Masuulka macluumaadka shakhsiyeed

Waaxda dhaqanka iyo wakhtiyada firaaqada ee degmada Sundsvall Ciwaankooda.
Norrmalmsgatan 4, 851 85 Sundsvall
lanbarka uurka: 212000-2411
Taleefanka: 060-19 10 00

Soo gudbinta cabashada iyo qabashada

Hadii aad rabtid in aad soo gudbiso cabasho ku saabsan qaabka aanu ula macaamilno macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaad la xidhiidhtaa kormeerayaasha xogagaha.
Datainspektionen
Box 8114, 104 20 Stockholm
Telefon: 08-657 61 00, E-post:
datainspektionen@datainspektionen.se